



Fariintani waxaa dhawaan iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo galin doonaa :
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 6, 2021-ka

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Shuruudaha Tallaalka ee loogu talagalay Daryeel Bixiyayaasha

Bisha Ogoosto 4, Guddoomiyaha Gobolka [ayaa ku dhawaaqday](#) in ay u tilmaantay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) in ay soo saaraan xeer faraya baaritaanka COVID-19 oo toddobaadle ah oo loogu talagalay goobaha daryeelka caafimaadka si looga hortaggo faafida cudurka COVID-19, kaasi oo la iska dhaafi karo marka la haysto caddeynta tallaalka.

OHA waxay soo saartay [xeerkeeda](#) Ogoosto 5. U hoggaansanaanta buuxda ee xeerka ayaa la iskaga baahan yahay muddo aan ka dambeyn Sibtambar 30, 2021.

Xeerkani wuxuu khuseeyaa goobaha soo socda ee Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS):

- Guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-saacadood
- Guryaha daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD

Waan ognahay in ka ilaalinta dadka qaba I/DD ee COVID-19 uu yahay mudnaantayada ugu sarreysa. Waxaan sidoo kale aqoonsanahay saameynta ay dhici karto in tani u ku yeelato shaqaalaha, oo culeys dheeraad saarto hay'adaha isla hadaba la kulmaya caqabadaha dhanka shaqaalaha oo la taaban karo. Qorshahayagu waa in aan si degdeg ah u soo ururino talooyinka daneeyayaasha ee fikradaha lagu taageerayo daryeel bixiyayaasha inta ay la qabsanayaan shuruudahan cusub. Waxaan tixgelinaynaa fikrada sida maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay

dhiirigelinta tallaalka iyo dhaqaalaha loogu talagalay baaritaanka COVID-19. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan tani ayaa waqti dhow la heli doonaa.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.